



Reimagining Education During the Pandemic

**PORTLAND
PUBLIC SCHOOLS**



Wixii ku Cusub PPS: Qorshayaasha rubuca sadexaad oo ay kujiraan Talaalada iyo Fursadaha Waxbaridda Fool-ka-foolka ah oo Xadidan

Janaayo 26, 2021

Qoysaska iyo Shaqaalaha PPS ee Sharafta leh,

Waxaanu idiin balan qaadnay inaanu idin siino faahfaahin ballaaran kahor dhammaadka rubuca labaad. Ka dib dhawr horumar, oo ay ku jiraan kuwa ku lug leh waajibaadka gobolka iyo soo saarista tallaalka Oregon, waxaanu jecel nahay inaan kula wadaagno waxa qorshayaasheena yihiin toddobaadyada soo socda.

Marka la soo koobo, waxaanu ku **bilaabi doonaa rubuca saddexaad ee sanad dugsiyeedka (Q3) anagoo sii wadayna Waxbarashada Onlaynka ah ee Dhammaystiran, iyadoo la ballaarinayo fursadaha fool-ka-foolka ah ee ardayda qaarkood**, iyadoo lagu bilaabay barnaamijyo laga bilaabay 19 goobood dugsiyeed marka hore waxaana la rajeynayaa inay wada gaaraan dhammaan dugsiyada bisha Maarso. Waxaan sidoo kale dardar galineynaa qorshayaasheena ah in dib loogu furo dhawr isguul waxbarashada isku dhafka ah biloowga bisha April, oo loogu talagalay ardaydayada yaryar (iyadoo ardaydu inta toddobaadka lagu jiro kolba mid u wareegayaan waxbarashada fool-ka-foolka ah iyo tan onlaynka ah).

Dhambaalkan waxaa ku qoran qaybo ku saabsan:

- Qiyaasaha iyo tilmaamaha hadda jira
- Tallaabooyinka caafimaadka iyo badbaadada
- Qorshaha tallaalka shaqaalaha dugsiga
- Fursadaha goobta ee ardayda, oo ay ku jiraan ciyaaraha fudud
- Joogtaynta sii wadashada waxbarashada, oo ay ku jiraan farshaxanka
- Taageerada ardayda iyo qoysaska
- Soo kabashada waxbarashada



Guddiga La-talinta Caafimaadka, Talooyinka Maamulka Caafimaadka Oregon, Qiyaasta Hadda jirta

Sidii xaalku ahaan jiray intii cudurku jiray, waxaanu ku sii jiraynaa xiriirka joogtada ah iyo wadashaqeyn aanu la leenahay hay'ado caafimaadka dadwaynaha iyo hay'ado dawladeed oo fara badan, oo ay ku jiraan xafiiska Badhasaab Brown, Maamulka Caafimaadka Oregon, Waaxda Waxbarashada ee Oregon, Degmada Multnomah iyo OHSU, oo ay weheliso [Guddiga La-talinta Caafimaadka](#) ee degmadeena.

COVID-19 wuxuu saamayn ugu yeeshay bulshadeena siyaabo dhawr ah, walina kamaynaan taqalusin cudurkaan faafa. Xogtii ugu dambaysay ee lala wadaagay Guddigayaga Waxbarashada waxay muujinayaan in tirada kiisaska COVID ay weli ku badan yihiin Degmada Multnomah, ayna muhiim u tahay sidii horeba inaan dhammaanteen raacno dhaqanka wanaagsan ee caafimaadka dadwaynaha sida xirashada afsaabka, gacmo-dhaqashada iyo kala fogaanshaha bulshada.

Laga soo bilaabo bishii Maarso ee la soo dhaafay, go'aamadeenna waxa lagu saleeyey cilmiga sayniska, waxa loo qaatay si waafaqsan hagitaanka iyo xayiraadaha caafimaadka dadwaynaha, waxaana xuddun u ahaa sinnaanta jinsiyadeed iyo caddaaladda bulsheed. Ahmiyadeenna ugu saraysa ayaa ah ilaalinta caafimaadka iyo badbaadada ardaydeena iyo shaqaalaheena iyadoo la ilaalinayo sii wadidda waxbarashada.

Sidii ay ahaan jirtay xaaladdu intii cudurkani jiray oo dhan, wali waxaa naga go'an furitaanka dugsiyada markii ay nabdoon tahay oo suuragal tahay in sidaas la yeelo. Laba isbaddal oo dhawaan ka dhacay heer gobol ayaa hadda noo oggolaanaya inaan sii dedejino qorshayaasheena dib u furista.



Tilmaamaha ODE ee la Cusbooneysiisay

Marka hore, Waaxda Waxbarashada ee Oregon ayaa cusbooneysiisay hagitaankeeda [Dugsiyo Diyaar ah](#), [Bartayaal Nabdoon](#) bisha Janaayo 19. Wacaashan ugu dambaysay, Waaxda Waxbarashada ee Oregon waxay wax ka baddashay heerarka kiisaska dadweynaha ee COVID, oo ku saleysan qaabdhismeedka Machadka Caafimaadka Caalamka ee Harvard. Qiyaasaha degmooyinku waxay sii wadaan inay noqdaan "waxa ugu fiican ee lagu go'aaminayo marka kiisaska ay gaarsiisan yihiin heer hoose oo ku filnaan kara in lagu noqdo waxbarista fool-ka-foolka ah." (Wixii cusub ee ODE)



Waxaanu ku faraxsanahay in dib u habayntu ay oggolaan doonto in si dhakhso leh loo ballaariyo waxqabadyada fool-ka-foolka ah ee dugsiyadeenna. Gaar ahaan, kor ugu kaca heerka kiisaska COVID ee waxbarashada onlaynka ah ee khasabka ah ilaa 350 ama ka badan oo kiisas muddo labo toddobaad ah oo ay weheliso isbaddalka hoos u dhaca kiisaska Degmada Multnomah ayaa noo oggolaanaya inaan horay u socono. Laga bilaabo Janaayo 16, heerka kiiska degmada ee labada toddobaad wuxuu ahaa 293.6.

Ogaysiis dheeraad ah: waxaanu si dhaw ula soconaynaa, annagoo la shaqaynayna khabarada caafimaadka dadwaynaha, noocyada cusub ee COVID-19 ee hadda ka soo muuqanaya Maraykanka.

Noocyadaasi waxay saamayn ku yeelan karaan wax kamid ah ama dhammaan qorshayaasheena guga.



Tallaabooyinka Caafimaadka & Badbaadada

Badbaadada ayaa kusii nagaanaysa xudunta hagitaanka gobolka. In kasta oo heerarka kiisaska COVID dib loo habeeyey, shuruudaha badbaadada ee hadhay iyo nidaamyada gudaha *Dugsiyo Diyaar ah, Bartayaal Nabdoon* waxay sii ahaan qaar khasab ah. Waxaa jira liis dheer oo ah shuruudaha aan u diyaarinay inaan fulino, kuwan waxaa ka mid ah:

- Baaritaanka gelitaanka ee albaabka dugsi kasta
- Saxeexidda raadraaca isku dhawaanshaha ee nidaamka COVID
- Afsaabyada (marka laga reebo baahida caafimaad/naafonimo) ee dhammaan ardayda iyo dadka waaweyn
- Meelaha go'doominta ee loogu talagalay shakhsiyaadka astaamaha leh
- Kala fogaanta bulshada: 35-mitir laba jibbaaran qofkiiba si loogu oggolaado kala fogaansho jireed
- Abuuritaanka kooxo ama guutooyin ardayda ah si loo:
 - Yareeyo tirada guutooyinka ee uu ardaygu la falgalo
 - Hubiyo in ardaydu aysan la macaamilin in ka badan 100 qof toddobaad gudihiis, oo ay ku jiraan muddayn ku-talagal leh, kooxayn iyo dhaqdhaqaaq xaddidan oo ku aaddan kambasyada
- Nidaamyada nadaafadeed oo adag, oo ay ku jiraan helitaanka gacmo nadiifiyaha
- Tallaabooyinka hagaajinta tayada hawada (oo ay kujiraan miirayaasha HVAC ee la casriyeeyay iyo kuwa hawada lagu sifeeyo ee meelaha aan hawo wanaagsan lahayn)
- Dib-u-xoojinta dhaqamada wanaagsan ee caafimaadka dadweynaha iyo nadaafadda, iyo ku xoojinta dhambaallo la diro, boodhadh iyo calaamado



Qorshaha Tallaalka Shaqaalaha Dugsiga

Ta labaad, oo aad muhiim u ah, tallaalada COVID-19 ayaa hadda lagu qaybinayaa Oregon. Waxaanu sheegnay dayrta in hal dhinac oo muhiim ah dhanka dib u furidda fasalada ay ahayd helitaanka tallaalada barayaasha iyo shaqaalaha dugsiga. Badhasaab Brown wuxuu go'aansaday inuu [mudnaanta siiyo helitaankan](#) barayaasha, iyadoo la tixgelinayo ahmiyadda weyn ee ay leedahay in si badbaado ah loo furo dugsiyada.

Nidaamyada daryeelka caafimaadka ee agagaarka Portland ayaa hadda la kaashanaya degmo dugsiiyeedyada, oo ay ku jiraan PPS, in ay siiyaan tallaalka barayaasha, shaqaalaha dugsiga iyo saaxiibadayada bulshada ee la shaqeeya ardayda iyo qoysaska. **Tallaaladu waxay bilaabmayaan toddobaadkan.** Iyadoo ku xiran xaddiga qiyaasta tallaalka ee loo heli karo bixiyayaasha caafimaadka ee Oregon, waxay qaadan doontaa ugu yaraan afar toddobaad kahor intaan dhammaan barayaasha iyo shaqaaluhu fursad u helin inay helaan *labada* wareeg ee tallaalka, oo si buuxda waxtar u leh laba toddobaad *kadib* qiyaasta labaad.

Shaqaalaha iyo qoysaska qaba su'aalaha guud ee ku saabsan tallaalka COVID-19, waxaanu samaynay [webbeej tallaalka](#) u gaar ah oo ay kujiraan khayraadyo badan. Waxaanu sidoo kale wada-qaban doonnaa

Wadahadalka Guddiga Tallaalka oo maqal iyo muuqaal ah Degmada Multnomah iyo Isbaheysiga Bulshooyinka Aan Caddaanka Ahayn Jimcaha, Janaayo 29, laga bilaabo 5:00 - 6:30 gd. Waxaad ka daawan kartaa wadahadalka adoo galaya boggayaga [Kanaalka PPS YouTube](#).



Ballaarinta Fursadaha Goobta ee Ardayda ee Ku Soo Laabashada Dugsiga

Inta aanu ku jirno oggolaanshaha shaqaalaha wajahaya ardayda inay fursad u helaan inay helaan labada qiyaasood ee tallaalka, ula soconayno isbaddallada cabireed ee caafimaad ee hagaya dib-u-furiddeenna, oo aanu sii wadno inaan la shaqeyno saaxiibadeena shaqaalaha si aan uga heshiinno sida aan u sii wadi doonno si sifo nabad ah loogu soo noqdo dugsiga, **waxaanu ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqno bilawga, iyo soo-saaridda iyo ballaarinta joogtada, ee waxbarista fool-ka-foolka ah ee xaddidan (LIPI)**. Waxaan soo bandhigi doonaa oo uga furaynaa LIPI dhammaan dugsiyada sadex waji. Waxaad ka heli kartaa macluumaad, oo ay ku jiraan dugsiyada kaqaybgalaya iyo taariikhaha bilaabidda, jadowalkaan wejiyada leh [halkan](#).

Wajigeena 1aad ee LIPI wuxuu toddobaadkan ka bilaabmayaa Madison High School. Waxaan ku soo saaraynaa barnaamijyada goobta anaga oo mudnaanta siinayna ardayda leh baahiyaha ugu sareeya. Waxaan usii wadi doonaa ku biirinta dugsiyada hadba marka la ansixiyo qorshooyinka xero kasta, si loo hubiyo in la ilaaliyo dhamaan hagidda badbaadada ee loo baahan yahay, iyadoo aan tijaabinayno qawaaniinta iyo diyaarinta gaadiidka iyo taageerada kale ee ardayda. Waxaan u mahadcelineynaa barayaasha iyo shaqaalaha kale ee iskood isu xilqaamay inay kaqeybqaataan bixintan fool-ka-foolka ah kana shaqeynayo sidii loo dedejin lahaa soo-saariisteen sida ugu dhaqsaha badan oo badbaado leh oon ku sameyn karno.

Haddii aadan aqoon u lahayn ereygan "LIPI", waa qaab xerada gudaheeda ah oo ay taageerto Waaxda Waxbarashada ee Oregon oo loogu talagalay in lagu daboolo baahiyaha **kooxo khaas ah** oo arday ah iyadoo lagu saleynayo waxbarashada, xiriirka, shucuur-buldheedka, manhajka, waxbarid, iyo/ama taageerooyin qiimeyn ah ee loo baahanyahay. Shaqaalaynta, oo ay kujiraan barayaashu, waxay ku dhisan tahay is-xilqaan. Waa kuwan xaqiiqooyin kale oo LIPI ah:

- Kooxaha LIPI waxay ka koobnaan doonaan in aan ka badnayn 20 arday;
- Ardayda kaqeybgaleysa waxaa lagu xaddiday labo koox toddobaadkiiba goobtiiba;
- Dhammaan ardayda iyo barayaashu waa inay ilaaliyaan shuruudaha maaskaraha, kala-fogaanta jireed ayna raacaan hawlgalkeenna hab-raaca badbaadada;
- Kalfadhi kasta oo LIPI ah wuxuu socon doonaa illaa laba saacadood.

Badbaaadu wuxuu udub dhexaad u yahay qorshaynta LIPI oo dhan. Dugsiyadu waa inay dhameystiraan qorshe faahfaahsan oo ku saabsan badbaadada iyo dib-u-furidda ee ay tahay inaan u gudbino Waaxda Waxbarashada ee Oregon si ay u ansixiso. Qorshahan waxaa ka mid ah qorshayaasha dhismaha iyo fasalka, hab-maamuuska ka qeybgalinta shaqaalaha iyo qoyska, tilmaamaha tababarka shaqaalaha, indha-indhaynta qasabka ah ee la raacayo tilmaamaha ka socda OHA iyo Xarumaha Xakamaynta Cudurrada, qorshaha daryeelka iyo waxyaabo kaloo badan. Maaddaama dugsi kasta loo oggolaaday qorshihisa shaqsiyeed, dugsiyo dheeri ah ayaa bilaabi doona bixinta barnaamijyo kooban oo goobta ah sidoo kale. LIPI waxay matalaysaa barnaamijki ugu dambeeyay ee xerada lagu kordhiyay ee dugsiyada PPS sanad dugsiyeedkaan.

Marka lagu daro fursadaha waxbarida kooban ee goobta, PPS waxay sii waddaa inay bixiso tababbarka

ciyaaraha fudud, taas oo ay soo dhoweeyeen ardaydeena cayaaraha fudud. **Ballaarinta ciyaaraha fudud**, oo ay kujirto soo noqoshada suuragalka ah ee (wax laga beddelay) layliyada dhamaystiran iyo, ugu dambeyntiina, tartan kooxeedka, waxay kuxirantahay [hagitaanka la xoojiyay](#) ee Maamulka Caafimaadka Oregon iyo Ururka Hawlaha Dugsiga Oregon (OSAA). **Xilliyadaha isboorti ee soo socda ee wax laga beddelay** waxaa aqoonsaday OSAA, laakiin waxay ku xiran yihiin jaangooyooyin caafimaad oo oggolaanaya hawlahaan:

- Xilliga 2 ee OSAA: Febraayo 22 ilaa Abriil 10 oo loogu talagalay cayaaraha soo socda: kubbadda gacanta*, kubbadda laliska, kubbadda cagta, iyo orodka dheer
- Xilliga 3 ee OSAA: Abriil 5 - Maayo 22 ee beesbaal, softibaal, waddada & garoonka, teeniska iyo golof.
- Xilliga 4 ee OSAA: Maayo 10- Juun 26 kubbadda koleyga *, dabaasha, iyo lagdinta *

* Cayaaraha isboortiga istaabashada buuxda, sida kubada gacanta, ayay mamnuucday OHA.

Waxaan u mahadcelineynaa ardayda, tababarayaasha, agaasimayaasha isboortiga iyo shaqaalaha kale ee raacay tilmaamaha iyo dhaqamada badbaadada ee u oggolaaday waxqabadyada iyo tababarka kooxda ee aadka loogu baahnaa.

Hawlaha isboortiga ka sokow, kooxda muuqaalka iyo bandhig faneedka (Visual and Performing Arts (VAPA)) ee degmada ayaa bilaabi doona inay siiso **fursado bannaanka kooxda heesaha iyo xubnaha baandeyda dugsiga sare**, sidoo kale bilaabanayo bisha Febraayo. Waxaan ku faraxsanahay inaan bilowno maqalka dhawaqyada muusikiisteyaasha ardaydeena ee dugsiyadeenna sare.

Waxaan aad u xiiseyneynaa inaan ku soo dhaweyno ardayda barnaamijyadeenna cusub ee LIPI, labadaba faa'iidooyinka gaarka ah ee ay fursadahaani siinayaan ardayda iyo tallaabooyinka xiga ee ku saabsan **soo bandhigidda waxbarista isku dhafan** ee dugsiyadeenna. Dhaqanka caafimaadka iyo nabadgelyada iyo borotokoolka loo isticmaalay barnaamijyada LIPI, sida kuwa la xiriira tababbarka ciyaaraha fudud iyo soo bandhigidda waxqabadyada farshaxanka, waxay sii socon doonaan iyadoo arday iyo shaqaale badan dib ugu soo laabtaan dhismayaasha dugsiyadeenna.



Xusuusin dheeraad ah oo ku saabsan Qorsheynta Caafimaadka & Badbaadada

Fahamka muhiimadda ay leedahay dhaqamada iyo borotokoolada xoojinta caafimaad iyo nabadgelyo ee ulakaca ah, kooxaheenu waxay shaqeeyeen muddo bilo ah si ay uga dhigaan dhismayaasha dugsiga kuwo badbaado u leh ardayda iyo shaqaalaha. Xarumaheenna, dayactirka, xanaaneynta iyo kooxaha kaleba waxay saacado aan la soo koobi karayn ku qaateen hagaajinta iyo badelidda banaanada dhismooyinka iyagoo filayo dib ugu soo dhaweynta ardayda hoolkeenna iyo fasalladayada.

Habraacyada Hawlgalka Heeraysan (SOPs) ee PPS waxaa ka mid ah hagnosis iyo hab-maamuusyo ka hadlaya baaritaanka gelitaanka, bas raacidda, nadiifinta iyo jeermiska dugsiyada, raad-raacidda istaabashada, kala fogaanshaha jireed, qalabka ilaalinta shakhsiyeed (PPE), isticmaalka musqusha, hawo-qaadashada iyo waxyaabo kaloo badan. Wixii macluumaad dheeraad ah, waxaa lagugu casuumay inaad soo booqato [boggayaga hore ee SOP](#), oo si joogto ah loo cusbooneysiyo.

Ardayda iyo shaqaalaha galaya dugsiyada waxay ogaan doonaan dhowr waxyaalood oo cusub oo ay ka mid yihiin:

- Calaamadaha khaas ah iyo calaamadaynta sagxadda si loo hubiyo kala fogaanshaha bulsheed
- Xarumaha gacmo nadiifinta
- Hab-maamuus gaar ah oo soo-galidda iyo ka bixidda ah
- Plexiglass (Bac la iska-dhex arko) iyo caqabado kale oo jidheed
- Tirada miisaska oo yaraaday fasalada si loo ilaaliyo kala fogaanshaha bulsheed (oo uu u baahan yahay Gobolka Oregon inuu ahaado 35-fiit oo saddex-geesood ah)
- Meel gaar ah oo loogu talagalay ardayda ama shaqaalaha muujiya inay astaamo leeyihiin maalintii
- Nadiifinta joogtada ah ee sagxadaha badanaa la isticmaalo

Iyada oo qayb ka ah hagaajinta dhismayaashayada nidaamyada 'HVAC (kuleylinta, hawo-qaadashada, iyo qaboojiyaha), waxaan dib u eegnay dhowr teknoolojiyad si loo hagaajiyo qulqulka hawada iyo waxyaabaha lagu daray sida shaandheeyaasha hawada la qaadan karo markii loo baahdo. Intii aan sii wadnay raadinta siyaabo lagu sii wanaajiyo waxqabadka HVAC, **dhammaan dhismayaasha dugsiga PPS waxay la kulmaan heerarka tayada hawada ee caafimaadka bulshada** ee hadda ay dejiyeen Hay'adda Ilaalinta Deegaanka Mareykanka iyo Xarumaha Xakamaynta Cudurrada, Ururka Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada ee Oregon, iyo Degmada Multnomah.

KGW-TV ayaa dhawaan booqday Harriet Tubman Middle School iyada oo ay weheliyaan Madaxa Dugsiyada, Dr. Shawn Bird. Waxaad ka daawan kartaa socdaalka adigoo [gujinaya halkan](#) si aad u aragto tusaale muuqaal ah oo ku saabsan sida dhismayaasha dugsiga loogu diyaarinayo soo dhaweynta ardayda. Waadna filan kartaa inaad aragto dhowr sawirro, oo degmadu soo saartay iyo fiidiyowyo cusub toddobaadyada soo socda, iyadoo aan furayno iskuullo iyo fasallo badan.

Waxaan dhowaan wadaagi doonaa macluumaad faahfaahsan oo sharraxaya waxyaabaha sida dhismaha deegaanka fasalkeenna u ekaan doonaan iyo cusbooneysiinta nidaamka raacitaanka basaska dugsiga ee aan u kuurgali doonno inta lagu jiro cudurkan faafa. Haatanna, kooxaheennu waxay sii wadaan inay qabtaan shaqo aad u wanaagsan si ay noogu oggolaadaan inaan ugu furno dhismayaashayada si badbaado ah ardayda iyo shaqaalaha.



Qorsheyn ayaa u Socoto Qaabka Waxbaridda Isku-dhafan

Dhammaan tallaabooyinkan caafimaad iyo badbaado waxay muhiim u yihiin awooddeena in aan ugu dambeyntii dib u furno dugsiyada **baridda qaabka iskudhafan**, halkaasoo **ardaydu ku kala badashaan toddobaadka gudahiisa barashada fool-ka-foolka ah iyo tan onlaynka ah**. Hadafkeenu waa inaan bixinno waxbarid isku-dhafan inta lagu jiro rubuca seddexaad, iyadoo lagu bilaabay dhowr dugsiyo hoose bisha Maarso. Waxaan mudnaanta siin doonaa bartayaashayada ugu da'da yar, kuwaas oo inta badan kobac ahaan u baahan in wax lagu baro fool-ka-fool. Waxaan rajeyneynaa inaan ugu dambeyn ku bixinno waxbarid isku-dhafan dhammaan dugsiyada hoose dhexe.

Barashada Onlaynka ee dhamaystiran (CDL) waxay u sii ahaan doontaa ikhtiyaar ardayda ay qoysaskoodu door bidaan inay ardaydoodu ku sii jiraan onlayn, waqti buuxa ee inta sanad dugsiyeedkan socdo. **Toddobaad gudahiis, waxaan u diyaarin doonaa foomka diiwaangelinta onlaynka ah ee qoysaska ardayda dugsiga hoose iyo kuwa dhexe si loo qiyaaso heerka danaynta ardayda kaqeybgalaya qaabka waxbaridda ee onlaynka ah ama kuwa isku-dhafan.** Fadlan naga filo iimayl maalmaha soo socda. Waxaan sidoo kale qoysaska kula xiriiri doonaa xiriir toos ah ee ka imanaya

dugsiyada iyo la-hawlgalayaasha bulshada ee dhaqanada khaaska ah. Waa muhiim inaan ogaanno dookhaaga ku saabsan baridda isku-dhafka ama baridda onlaynka ah, si aan u qorsheyno shaqaale iyo gaadiid ku habboon.

Jadwalka dugsiya sare iyo shuruudaha gobolka ee ah in ardaydu aysan la macaamili karin in ka badan 100 ardayda kale ee dugsiya ah ayaa ka dhigaya siinta baridda isku-dhafka ardayda dugsiya sare mid aad u dhib badan; laakiin waxaan ka shaqeyneynaa dhowr xaaladood oo ay ku jiri doonaan ugu yaraan heer ka mid ah barashada xerada ee ardayda dugsiya sare. Waxaan ku tala jirnaa inaan wadaagno faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan qaabeynta la soo jeediyay iyadoo aan ka shaqeyneyno qaar ka mid ah caqabadaha ku lug leh hirgelinta qaabka isku-dhafan ee heerka dugsiya sare.



Joogtaynta Sii wadida Barashada iyo Xiriirka iyada oo loo marayo Barashada Onlaynka Dhamaystiran

Iyadoo aan ka shaqeyneyno fursado dheeraad ah oo loogu talagalay waxbarista fool-ka-foolka ah, Barashada Onlaynka dhamaystiran ayaa u sii socota dhammaan ardaydayada. Waxaan ku faraxsanahay macallimiinteena, maamuleyaasheena iyo shaqaalaheena taageerada ee siiyay ardaydooda khibrado barasho onlayn ah oo badan una helay habab hal-abuurimo leh oo ardayda lagu mashquuliyay waqtigan aan horay loo arag.

Waxyaabaha la cadeeyay guggii la soo dhaafay ka dib markii la bilaabay CDL waxay ahayd ahmiyadda muhiimka ah ee ah ardayda inay dareemaan inay xiriir la leeyihiin macallimiintooda iyo bulshadooda dugsiya si loogu guuleysto barashada onlaynka. Si loo abuuro dareenka bulsheed, dugsiyada hoose waxay hirgelinayaan shirarka subaxa, fasalada dhexe waxay ku howlan yihiin la-talin ama isku xirnaanta barashada dareenka bulsheed (SEL), dugsiyadeenna sarena waxaa loo beddelay afar koorso semesterkiiba si loogu oggolaado ardayda inay xiriir weyn la yeeshaan macallimiintooda. Dhamaan heerarka fasalada oo dhan PPS waxay ku dhaftay SEL qaabkeena waxbarid. Waxaan si joogto ah u siinnaa fursado ardayda da 'kasta oo ay kula wadaagaan dareenkooda iyo welwelka ay qabaan. Casharrada adkaysiga, iyo sidoo kale manhajka kale ee barashada shucuurta bulsheed, iska-warqabka subaxa, iyo waqtiyada wareegga waxay ardayda siisay habab gaar ah oo ay ugu gudbin karaan dareenkooda iyo waxa ay daneeyaan inta lagu jiro aafadan.

Waxaan ognahay in barashada onlaynka ay ka maqan tahay qaybo ka mid ah waxyaabaha caadiga ah ee barashada fool-ka-foolka ah. Si loo taageero ardayda iyo barayaasha degmada oo dhan, aagagga aasaasiga ah ee maadooyinka ayaa loo qoondeeyay inay diirada saaraan shaqada ugu muhiimsan ee fasal kasta, kooxaha maadooyinka xafiiska dhexe waxay ka taageerayaan barayaasha walxaha casharka maalinlaha ah ee loogu talagalay bixinta onlaynka. Isla kooxahaas waxay si joogto ah ula falgalaan barayaasha oo ay sameysnayaan badello koorsooyin iyadoo aan sii wadno sannad dugsiyeedka.

Si loo hubiyo in barashada onlaynka ay lu dheeli tirnaato, **Farshaxanada Muuqaalka & bandhigga** iyo **Jimicsiga Jirka** ayaa wali qeyb ka ah mahadaha ardaydeena. Meelaha maadooyinkan waxaa diiradda lagu saaray abuuridda farxadda, dhaqdhaqaaqa, iyo hal-abuurnimada maalin kasta.

Musiibadani waxay ku keentay baahida **u wareejid taariikhi ah ee goobaha barashada dhijitaalka** iyo adeegsiga aaladaha teknolijiyadda si loo bixiyo waxbarashada Ka sokow siinta laabtoobyada ama aaladaha kombuyuutar arday kasta oo degmada u baahan mid, waxaan ku bilownay sanad dugsiyeedka iyadoo la siinayo barayaasheena aqoon xirfadeed oo ku saabsan barashada qalabka iyo ilaha la heli karo si loo helo kalsooni iyo taageero xirfadaha lagama maarmaanka u ah gaarsiinta waxbarashada onlaynka

ah ee wax ku oolka ah.

Xilliga dayrta, dashboodyo ayaa loo sameeyay dugsiyadeenna iyo kooxaha taageerada dugsiyaga si ay ula socdaan una fududeeyaan ka-qaybgalka ardayda. Xilliga dayrta iyo jiilaalka oo dhan, 88-90 +% ee ardaydeena fasallada 6-8 waxay ku hawlanadeen goobaha barashada Canvas-ka si toddobaadle ah.

Iyo, gabagabada rubuca koowaad, buundooyinka ardayda ee fasalada dugsiyadeenna sare ee dhammaystiran waxay inta badan la jaan qaadeen waxqabadkii hore.

Iyadoo aan u sii dhowaanayno rubuca saddexaad, waxaa jiri doona laba fursadood oo dheeri ah oo aan ku cabbiri karno **horumarka ardayda** iyo waaya-aragnimadooda ee Barashada Onaynka Dhamaystiran. Bilowga Febraayo, waxaan u samayn doonnaa **maamulidda onlaynka ee qiimeynta MAP ee Akhriska iyo Xisaabta** ardaydayada fasalada 3-8. Tani waa fursad isxilqaan ah ee ardaydeena iyo waalidiinteena oo noo oggolaan doonta inaan wax ka barano koritaanka iyo hanashada ardayda inta lagu guda jiro Barashada Onlaynka Dhamaystiran, waxayna naga caawin doontaa qorsheynta fursadaha soo kabashada barashada. Qiimeynta MAP waa fursad sifiican loogu fahmo looguna qorsheeyo baahida waxbarasho ee ardayda. Xogta waxaa loo isticmaali doonaa oo keliya ujeedooyin qorsheyn loomana adeegsan doono ujeedooyin qiimeyn ah. Ugu dambeyntiina, qiimeynta MAP waxay muhiim u tahay qorshaynteena simistarka labaad, iyo Qorsheheenna Soo-kabashada Barashada, ee xisaabta iyo farshaxanka luuqadda iyo in aan xoogga saarno qaybaha ballaaran ee manhajka ama aan dib ugu laabanno qeybaha muhiimka si siyaabo cusub ah. Maamulka qiimeynta MAP waxaa loo qaabeeyey inay saameynta ugu yar ku yeeshaan waqtiga waxbarida waxaana loo naqshadeeyay in lagu xisaabtamo xaqiiqda ah in ardayda ay ku waxbaranayaan jawi waxbarasho oo aad u kala duwan oo guriga ah.

Intaas waxaa dheer, **Sahanka Dugsiyada Guuleysta** wuxuu bilaabmi doonaa toddobaadka labaad ee Febraayo. Sidii horeba, sahankani wuxuu siin doonaa qoysaska, ardayda iyo shaqaalaha fursad ay ku bixiyaan ra'yi-celin ku saabsan isku xirkooda dugsiya, xiriirada is-aaminidda iyo dareenka lahaanshaha inta lagu jiro sanad dugsiyeedkan.



Taageerada Ardayda iyo Qoysaska

Waxaan fahamsanahay, oo aan si joogto ah uga maqalnaa waalidiinta, in masiibadan ay ku adkaatay in badan oo ardaydeena ah. Caafimaadka shucuur-bulsheed iyo maskaxeed ee ardaydeena, had iyo jeer waa walaaceena aasaasiga ah. Ama ha ahaato barasho CDL ah ama fool-ka-fool, waxaan sii wadeynaa inaan siino noocyo badan oo taageero ah ardayda iyo qoysaska. Kuwaas waxaa ka mid ah **Barashada sgucuur-Bulsheed (SEL), la-talinta iyo taageerooyinka caafimaadka maskaxda**, taageerooyinka akademiyeed, helitaanka baahiyaha aasaasiga ah, [kombiyuutarada iyo marin u helka intarneetka, iyo cuntada](#).

Dugsiyadeenu waxay leeyihiin la-taliyayaal iyo shaqaale bulsheed oo diyaar u ah ardayda inay la hadlaan. Xirfadlayaashani waxay kaa caawin karaan dejinta neerfaha iyo walwalka, ku siin karaan qof ku dhageysta waxayna ka caawiyaan ardayda ku xiridda ardayda ilaha kale ee bulshada. Waxaan sidoo kale iskaashi lasamaynay bixiyeyaal badan oo caafimaadka maskaxeed ah, oo ay kujiraan jaalleyaal caafimaadka maskaxeed ee dhaqamada u khaaska ah, kuwaas oo ku siiya taageero talin-taleefan (teletherapy) ahaan baahiyaha caafimaadka maskaxda. Haddii aad ogaato in adiga ama ilmahaagu aad u baahan tihiin taageeradaan, fadlan la xiriir macallinkaaga ama la-taliyaha dugsiya. Waxay kaa caawin doonaan inaad la xiriirto taageero.

Waxaan u diyaarinay hab ay ardayda si dhakhso leh ugu heli karaan ilaha fayoaqabka shucuurta iyo taageerada iyaga oo gujinayo badhan. Fadlan la wadaag barnaamijkan qiimaha leh oo nolosha badbaadinta u leh qof kasta oo aad taqaan: [Illaha Barnaamijka Dhallinyarada](#)

Haddii aad aragto in ardaygaagu dadka ka fogaanayo ama uu muujinayo calaamado kale oo murugo ah, waxaan kugu xasuumaynaa inaad ka faa'iideysato ilaha hoose.

Mid ka mid ah agabyada waxtar leh ayaa ah [Sida Dhallinyaradu u ilaalin karaan caafimaadkooda maskaxeed inta lagu jiro COVID19](#). Haddii ardaygaagu sii wado inuu muujiyo astaamaha murugada ama uu wadaago fikradaha is-dilka, fadlan wac **Xarunta Wicitaanka Caafimaadka Maskaxda** ee Degmadda Multnomah 503-988-4888. Kooxdooda khubarada caafimaadka maskaxda ayaa diyaar u ah inay caawiyaan qof kasta oo la kulma arrimaha caafimaadka maskaxda wakhti kasta, luqad kasta.

- Bilaash, 24/7 taageerada caafimaadka maskaxda
- Adeegyada tarjumaada ee dadka aan ku hadlin Ingiriisiga
- U gudbinta hay'adaha qiimaha jaban ama kuwa qiime-dhimista awooda qofka ku salaysan sameeyo
- Ka caawinta helitaanka bixiyeyaasha caafimaadka maskaxda
- Macluumaadka ku saabsan ilaha bulshada ee aan dhibaatooyinka ahayn

Waxaan kaloo ognahay in qoysas badan ay la daalaa dhacayaan baahiyo cunno, dhar iyo hoy. Halkan waxaa ku yaal linkiga liistada ilaha iyo adeegyada ay heli karaan qoysaska ku nool Portland: [Adeegyada Gargaarka Degdegga ah ee PDX](#)

Waxaan u bixinaa tiro kale oo ah taageerooyinka ardayda iyo qoysaska si toos ah iyo iyadoo lala kaashanayo ururada bulshada ee dhaqan ahaan khaaska ah. Waxaad ka heli kartaa **Liistadayada Taageerada** Ardayda iyo Qoyska adoo [gujinaya halkan](#).

Dhammaan agabyadan iyo taageerooyinkan waxay sii ahaan doonaan mid ay heli karaan ardayda iyo qoysaska PPS, waxaan rajaynayaa in haddii adiga ama qof aad taqaanid uu u baahan yahay, inaad la xiriiri doontaan macallinka ardaygaaga, lataliyaha dugsiga ama maamulka dugsiga. Waxaan halkan u joognaa inaan caawinno.



Qorshaha Soo-kabashada Barashada

Ugu dambeyntiina, waxaan ognahay in barashada fogaanta ay dhib ku ahayd ardayda, shaqaalaha, iyo qoysaska ku nool PPS iyo guud ahaan dalka. In kasta oo ardayda qaar ay u arkeen barashada onlaynka inay tahay qaab ku habboon, ardayda iyo macallimiinta badankood ma laha beddel buuxa oo bedello foo-ka-fool, waxbarasho fool-ka-fool ah, xiriir-dhisid iyo ka-qaybgalidda.

Aad ayey muhiim u tahay in ardayda ay helaan dhammaan taageerada lagama maarmaanka u ah si looga caawiyo inay ku sii socdaan wadada saxda ah. Taasi waa sababta kooxaheena baridda ay u dhisayaan dhowr fursadood oo ah soo kabashada barashada ardayda, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, **barnaamijyada xagaaga ee fool-ka-foolka ah ee la ballaariyay** ee aan rajeyneyno inaan u diyaarinno ardayda bilaha Juun, Luulyo, iyo Ogoosto. Is-gaarsiinta mustaqbalka, waxaan wadaagi doonnaa

faahfaahin ku saabsan **fursadahaan dheeriga ah ee waqtiga barashada la kordhiyay**, iyo taageerooyinka iyo hagitaanada kale ee aan ugu talagalnay inay helaan ardayda, inagoo u wareejineyno diiradeena iyo qorshayaasheena si aan u gudno waqtiga baridda lumay intii lagu jiray musiibadan.



Mahadnaq iyo Waxa inaga Horeeyo

Waan ognahay in cusbooneysiintan ay kujirto macluumaad badan, laakiin waxaan rabnaa inaan kaa siino sawir buuxa oo ah qorshayaasheena toddobaadyada soosocda iyo inaan fiirino qadarka cajiibka ah ee shaqooyinka daaha gadaashiisa ka socday ee bilaha badan hada socday.

Sanadkii la soo dhaafey wuxuu si weyn inoo adkaa shaqsi ahaan iyo bulsho ahaanba. Barayaasha ahaan, fursadaha lumay ee ah in ardayda lagula kulmo fool-ka-fool ayaa ah waxa ugu adag ee aan waligeen kala kulanno shaqooyinkeena.

Iyadoo ay wax adkaayeen, waxaan si qoto dheer ugu mahadnaqeynaa barayaasheenna, la-taliyayaasheena, shaqaalaha bulshada, maamuleyaasha, xoghayayaasha, shaqaalaha nafaqada, darawaliinta basaska, ilaaliyayaasha, iyo kuwa kale oo badan, oo ay ku jiraan waalidiinta, is-xilqaamayaasha iyo la-hawlgalayaasha bulshada, dadaalka ay sameeyeen waqtigan aan horay loo arag ee taageeradooda carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska PPS.

Waxaa na dhiirrigaliyay adkaysiga ay muujiyeen ardaydeena, ee sida geesinimada iyo go'aan adayga leh u wajahay musiibada iyo saameynteeda badan ee ay ku yeelatay mahadahooda dugsiyeed. Toddobaadkii la soo dhaafay kaliya waxaan helnay [xogta qalin-jabinta 2020](#) oo muujisay koro kale oo sannad-ba-sanad ah oo ay helaan ardayda PPS. Isbeddelkan wanaagsan, oo soo socday sannadihii la soo dhaafay, wuxuu caddeyn u yahay shaqada adag ee ay ardaydeenna iyo shaqaalahaennu u galeen si loo hubiyo in aqoonyahannadeennu ay la kulmaan shuruudaha qalin-jabinta iyo inay kasbadaan dibloomooyinkooda, ka hor iyo intii lagu jiray musiibada labaduba.

Waxaa na dhiirrigeliyay horumarkii ugu dambeeyay, oo ay kujirto helitaanka tallaalka barayaashayada iyo shaqaalaha dugsiga, iyo waxa ay uga dhigantahay bulshadeena ugu dambeyn ka gudubka carqaladeynta waxbarashada dadweynaha ee uu sababay COVID-19. Waxaan sii kordhaya kalsoonideena in annaga, oo taageero ka heleyno wada-hawlgalayaashayada shaqada, aan awoodi doonno inaan **u gudubno barashada isku-dhafka** ah guban. Waxaan sidoo kale ku rajo weynahay in maamulkan cusub ee federaalku uu mudnaanta siin doono taageerada iyo maalgalinta gargaarka COVID ee waxbarashada dad-weynaha ee K-12 si ay nooga caawiso kahortaga musiibadan isla markaana nooga caawiya sida ugu wanaagsan ee aan u hubin karno inaan awoodno inaan hirgalino noocyo badan oo taageero ah iyo barashada fursadaha soo kabashada ee ardaydeena.

Waana ku faraxsanahay wada shaqeynta asxaabta ee hogaamineysa degmooyinka dugsiyada halkan Oregon, iyo guud ahaan dalka, maadaama aan dhamaanteen isku dayeyno inaan dhisno xalka caqabadaha guud ee aan dhamaanteen la kulanno.

Waxaan xiriiri soo samayn doonaa maalmaha soo socda iyada oo faahfaahin dheeraad ah laga helayo bulshooyinka dugsiiyo khaas ah iyadoo aan ka fureyno baridda xaddidan ee fool-ka-foolka ah goobo la aqoonsaday. Hadda se, waad ku mahadsan tahay dulqaadkaaga iyo fahamkaaga joogtada ah.

